Somaliland Police Force Establishment (Amendment) Law This Law was passed by the House of Reps
Law No. 7/95 of 27 November 1995 on 27/11/1995 and amends Law No. 54 of 3/11/94
www.somalilandlaw.com

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-07/995

Tar: 4 September 1995
H a r g e y s a

XEER MADAXWEYNE NO. 07/995

Wax ka beddelka Sharciga Dhismaha iyo Xeer Nidaamiyha Ciidanka Booliiska (Ammendment for establishment and regulation of Somaliland Police Force).

MADAXWEYNAHA JSL:-

MARKUU ARKEY: Lifaaqa Axdi Qarameedka qodobkiisa 21aad oo faraya Xukuumaddu iney Booliiska ka dhigto Booliis Qaran.

MARKUU DARSEY: Sharciga dhismaha Ciidanka Booliiska lambarkiisu yahay 54GW. ee 3 Nov, 1994;

MARKUU EEGAY: Xeer-nidaamiyaha Ciidanka Booliiska Lam. RSLP/D-2 ee 13/01/95.

MARKUU DHAGAYSTEY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

ISAGOO TIXGELINAYA: Guddoonka Golaha Wasiiradda

WUXUU SOO SAARAY SHARCIGAN SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Ciidanka Booliiska heer deegaan ee ku xusna sharciga Dhismaha Ciidanka Booliiska iyo Xeer-nidaamiyihiisa, waxaa laga dhigey xubno ka tirsan Ciidanka Booliiska Qaranka.

Qodobka 2aad

Waa la baabi'iyey Qodobadan soo socda ee sharciga Dhismaha Ciidanka Booliiska dhamaan qodob ahaan; xubin ahaan ama xaraf ahaanba:

B. Qodobka 1aad xubintiisa 1aad xarafka (t);
T. Qodobka 1aad xubintisa 3aad;
J. Qodobka 5aad xubintiisa 2aad;
X. Qodobka 6aad;
Kh. Qodobka 7aad xubintiisa 2aad.

Qodobka 3aad.

Qodobadan soo socda ee sharciga dhismaha Ciidanka waa la baabi'iyey, waxaana lagu beddelay sidan soo socota;

B. Qodobka 4aad; soo jeedinta tirada ciidanka Booliiska Qaranka waxaa iska leh Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana u ogolaanaya Golaha Wasiirada.

T. Qodobka 9aad; qaabka shaqada Ciidanka Booliiska ee gobolada iyo Degmooyinku waa mid toos ah.

Qodobka 4aad.

Xeer-nidaamiyaha ciidanka waa la baabi'iyey qodobadiisa soo socda dhamaan qodob ahaan ama xubin ahaan, waxaana lagu beddeley:

B. Qodobka 2aad xubintiisa 3aad: qaab-dhismeedka ciidanka booliisku wuxuu ku salaysan yahay mabda'a Dimuquraadiyada ee maamulka dhexe;

T. Qodobka 13aad: dhamaan awoodihii xeer-nidaamiyuhu siinaayey Duqa Magaalada, waxaa si toos ah loogu wareejiyey Taliyaha Ciidanka Booliiska;

J. Qodobka 14aad: Iyadoo Qodobka 2aad ee Xeerka dhismaha Ciidanka Boliiska wax loo dhimeyn, ciidanku wuxuu u dhisan yahay sidan soo socota:

I. Taliska Ciidanka Booliiska;
II. Laamaha;
III. Qaybaha;
IV. Fadhiyada Gobolada iyo degmooyinka;
V. Saldhigyada Boliska;
VI. Rugaha.

Qodobka 5aad.

Qodob kasta oo tilmaamaya ciidanka booliska deegaanka oo aan baabi'intiisa iyo wax ka bedelkiisa lagu sheegin qodobada kor ku xusan, waxaa la waafajinayaa ciidanka Booliiska Qaranka.

Qodobka 6aad.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynuhu saxeexo.

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

(Maxamed Ibraahim Cigaal)
MADAXWEYNAHA JSL

Somaliland Police Force Establishment (Amendment) Law This Law was passed by the House of Reps
Law No. 7/95 of 27 November 1995 on 27/11/1995 and amends Law No. 54 of 3/11/94
www.somalilandlaw.com

Ref-07/11/1995

25

=JAMHUURIYADDA SOMALILAND=
-Golaha Wakiiladda-

I/2.

Hargeysa: 27/11/95

XEER LAMBAR 07 EE TARIIKH 27KII NOOFAMBER 1995KA,
-Dib u habayn Xeer nidaamiyaha Ciidanka Boliska-

GOLAHA WAKIILADDA SOMALILAND,

MARKUU DARSEY - Soo Jeedinta Madaxweynaha iyo Golaha Wasiiradda,

MARKUU KA DIODAY - Golaha Wakiiladdu

MARKUU EEGAY - Qodobka IIaad xubinta (T) fargadda Iaad iyo lifaaqiisa qodobka 2Iaad

MARKUU TIXGELIYEY - Baahida Nabad-Gelyadda Guud.

Wuxuu Goluhu ansixiyey Sharcigan soo socda.

QODOBKA IAAD

Ciidanka Boliiska heer deegaan ee ku xusnaa sharciga dhismaha Ciidanka Boliiska iyo xeer-Nidaamiyihiisa, waxaa laga dhigey xubno ka tirsan Ciidanka Boliiska Qaranka.

QODOBKA 2AAD

Waa la baabiiyey qodobadan soo socda ee sharciga dhismaha Ciidanka Boliiska dhammaan qodob ahaan i xubin ama xaraf ahaanba.

I.- Qodobka Iaad xubintiisa Iaad xarafka (T)
II.- Qodobka Iaad xubintiisa 3aad
III.- Qodobka 5aad xubintiisa 2aad
IV.- Qodobka 6aad
V.- Qodobka 7aad xubintiisa 2aad.

QODOBKA 3AAD

Qodobadan soo socda ee sharciga dhismaha Ciidanka waa la baabiiyey waxaana lagu bedelay sidan soo socota :-

b- Qodobka 4aad, soo jeedinta tirada Ciidanka Boliiska Qaranka waxaa iska leh Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana u xoggolaanaya Golaha Wasiiradda.

t- Qodobka 9aad, qaabka shaqada Ciidanka Boliiska ee Gobolada iyo Degmooyinku waa mid toos ah.

QODOBKA 4AAD

Xeer Nidaamiyaha Ciidanka aaa la baabi'iyey qodobadiisa soo socda dhammaan qodob ahaan ama xubin ahaan, waxaana lagu beddeley :-

b- Qodobka 2aad xubintiisa 3aad: qaabdhismeedka Ciidanka Boliisku wuxuu ku salaysan yahay mabda'a Dimuqraadiyada ee Marmulka dhexe.

T- Qodobka I3aad, dhammaan xwoodihii xeer-Nidaamiyuhu siinnayey Duqa Magaalada, waxaa si toos ah loogu wareejiyey Taliyaha Ciidanka Boliiska.-

J- Qodobka I4aad, iyadoo qodobka 2aad ee xeerka dhismaha Ciidanka Boliiska wax loo dhimeyn, Ciidanku wuxuu u dhisan yahay sidan soo socota :-

I- Taliyaha Ciidanka Boliiska,
II- Laamaha,
III- Qaybaha,
IV- Fadhiyada Goboladda iyo Degmooyinka
V- Saldhigyadda Boliiska
VI- Rugaha

QODOBKA 5AAD

Qodob kasta oo tilmaamaya Ciidanka Boliiska deegaanka oo aan baabi'intiisa iyo wax ka beddelkiisa lagu sheegin qodobada kor ku xusan waxaa la waafajinaya Ciidanka Boliiska Qaranka.-

QODOBKA 6AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynuhu Saxeexo Golaha Wakiiladuna ansixiyo.

(AXMED CABDI [illegible] BARDE-
-GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA S/L-

(Cabdi/man Cis[illegible]dulle)
-GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA S/LAND-